

Adeegyada U hogaansanaanta Xeerarka

Waxaan dadka deegaanka ah ka caawinnaa inay fahmaan oo ay buuxiyaan shuruudaha bulshada looga baahan yahay. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo Seattle Department of Construction & Inspections (SDCI, Waaxda Dhismaha iyo Kormeerka ee Seattle) websetkeeda U Hogaansamida Xeerarka www.seattle.gov/sdci/about-us/who-we-are/code-compliance

Sideen Kuu Caawin Karnaa?

- Baadhitaannada/kormeerada guryaha la kireysto, oo ay ku jiraan xaaladaha degdegga ah (biyo la'aan, kuleyl, koronto, tuubbooyinka biyaha)
- Dhismooyinka la dhiso rukhsad la'aan
- Kormeerka dhismooyinka banaan
- Goynta dhirta/geedaha
- Keydka qashinka ee deyrarka
- Xadadka badbaadada
- Geedaha ku yaala guryaha gaarka loo leeyahay oo soo gaaraya wadooyinka dadka ay maraan
- Sawaxanka dhismaha ee xilliyada ka baxsan saacadaha la ogol yahay
- Bedelaada guryaha ee ay sameeyaan is-kaashatada iyo shirkadaha




Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xeerarka aan xoojino, booqo websetka xeerarka SDCI: www.seattle.gov/sdci/codes.

Sida loo Codsado Caawimaad:

1. Codsigaaga caawimaad ka soo sameey khadka tooska ah adigoo isticmaalaya Seattle Services Portal (Barta Adeegyada Seattle):

<https://cosaccela.seattle.gov/>



Ka eeg meesha ka hooseysa ciwaanka "+Abuur Mid Cusub (+Create New)" oo dooro "Cabashooyinka - Dhismooyinka & Guryaha (Complaints - Building & Property)."

2. Wac Khadkayaga Cabashada iyo Macluumaadka (206) 615-0808.



Kheyraadyada kale ee Magaalada Seattle:

- **Xuquuqaha iyo macluumaadka kireysiga:**
Renting In Seattle (Wax Ka Kireysiga Seattle)
(206) 684-5700
- **Xoojinta baarkinka:**
Seattle Department of Transportation (Waaxda Gadiidka ee Seattle)
(206) 386-9012
- **Qashin ku daadinta sharci-darrada ah ee jidadka iyo wadooyinka:**
Seattle Public Utilities (Adeegyada Dadweynaha ee Seattle)
(206) 684-7587

